



## Dugsiyada sare oo ardayda fasallka 8-daad ku soo dhaweeeyay habeenada macluumaadka

Ardayda fasallka siddeedaad ee Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay heli doonaan fursad ay ku arkaan dugsigooda sare ee mustaqbalka marka kulamada dhanka macluumaadka laga qabto degmada oo idil laga bilaabo Oktoobar ilaa Janaayo. Xaafada, dugsiyada sare ee la kala dooranayo ee diirada la saarayo ee bedelka ah waxay ardayda iyo qoysaska siin doonaan fursad ay ugu soo wareegaan dhismaha dugsiga, kula kulmaan shaqaalaha isla markaana ku ogaadaan waxyaabo badan oo ku saabsan barnaamijyada tacliimeed iyo ciyaareed ee la bixiyo.

Marka laga hadlayo PPS, ardayda dugsiga sare waxay dhigtaan dugsiyada xaafadooda, ama waxay codsan karaan in ay dhigtaan Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson oo La Casriyeeyay, Dugsiga Sare ee Jefferson ee Kulliyadda Dhexe ee loogu talagalay Waxbarashada Horumarsan ama Xarunta Barashada ee Magaalada. **Codsiyada loogu talagalay Benson, Jefferson iyo MLC waxaa la aqbalayaa inta lagu jiro wakhtiga bakhtiyaanasiibka ee Noofambar 8-30.**

Ardayda fasalka siddeedaad ee ku nool goobta laga kala imaanayo ee Jefferson waxay leeyihiiin gelitaan la hubo oo ay gelayaan Jefferson ama dugsi sare oo dhammeystiran oo loo qoondeeyay iyada oo la eegayo cinwaanka. Kala xiriir la taliyahaaga dugsiga wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri [dugsiga sare ee loo qoondeeyay ardayga](#) ama soo deji/min-guuri [foomka isku qoondexnta labada ah](#). Qoysasku waa in ay buuxiyaan foomka kala doorashada isku qoondexnta labada ah ‘dual-assignment choice’ muddo aan ka dambeyn Jimcaha, Diisambar 7.

Haddii aad awoodi weydo in aad ka soo qayb gasho habeenka dhanka macluumaadka ee fasalka siddeedaad, dugsiyada qaarkood ayaa bixiya oo laga helaa in lagu soo wareego ama fursad lagu fiiriyo sida noloshu ardaygu tahay “shadow a student”. Qoysasku waxay wici karaan dugsi si ay u helaan macluumaad dheeraad ah ama booqo internet-ka si aad ogaato waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan dhacdooyinka iyo jadwallada dugsiga. (Fiiri liiska [website-yada dugsiga](#).)

Qoysasku waa in ay ka warqabaan in ardayda Dugsiga Sare ee Grant, ee fasallada ka dhiganaysay dhismaha Dugsiga Sare ee Marshall ee loogu talagalay sanad dugsiyeedyada 2017-18 and ’18-19, ay sanadka soo socda ku soo noqon doonaan dhismaha Grant oo la casriyeeyay. Dhanka kale, ardayda Madison waxay bilaabi doonaan laba sano oo ay joogayaan goobta Marshal inta uu dhismahooda ka socdo dib u dhisku. Akhri waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan shaqada casriyeeynta dugsiga sare ee guud ahaan [Heshiiska Hagaajinta Dhismaha Dugsiga ee PPS](#).

### Habeenada Macluumaadka Ardayda Fasalka Siddeedaad ee 2018-19

#### Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson oo La Casriyeeyay

Talaadada, Oktoobar 23, 6-8 habeenimo

Bandhiga Farsamo, Maarso 14 & 15, 6-9 habeenimo

**Dugsiga Sare ee Jefferson ee Kulliyadda Dhexe ee loogu talagalay Waxbarashada Horumarsan**

Talaadada, Oktoobar 23, 6-8 habeenimo

Khamiista, Noofambar 15, 6-8 habeenimo

**Dugsiga Sare ee Wilson**

Arbacada, Noofambar 7, 6-8:30 habeenimo

**Dugsiga Sare ee Madison**

Khamiista, Noofambar 8, 6-8 habeenimo

**Xarunta Barashada ee Magaalada**

Arbacada, Noofambar 14, 6-7:30 habeenimo

Talaadada, Noofambar 27, 6-7:30 habeenimo

**Dugsiga Sare ee Roosevelt**

Talaadada, Noofambar 27, 6-8 habeenimo

**“Waxka Ogow Franklin” Dugsiga Sare**

Arbacada, Noofambar 28, 6-8 habeenimo

**Dugsiga Sare ee Grant @ Marshall Campus**

(3905 SE 91st Ave.)

Khamiista, Noofambar 29, 6:30-8:30 habeenimo

**Dugsiga Sare ee Cleveland**

**“Bridging the Gap”**

Arbacada, Diisambar 5, 7-9 habeenimo

**Dugsiga Sare ee Lincoln**

Talaadada, Janaayo 8, 6-8 habeenimo